DEPARTMENT OF HEALTH

# Cudurka *Borrelia mayonii*

## Waa maxay cudurka *Borrelia mayonii*?

Cudurka *Borrelia mayonii* waa mid ka mid ah cudurada badan ee shilinta laga qaado ee Minnesota. Cudur-keenuhu wuxuu aad ugu dhaw yahay bakteeriyada keentaa cudurka Lyme, *Borrelia burgdorferi*. Waxaa markii ugu horreysay loo aqoonsaday inay sabab u tahay jirrada bani-aadanka ee Minnesota deggan sanadkii 2013. Tan iyo markaas, tiro yar oo xaalado ah ayaa laga soo sheegay dadka ay soo gaadhay shilin kaliya Midwest-ga sare.

## Sidee dadku u qaadaan cudurka *Borrelia mayonii*?

Dadku waxay ku qaadaan cudurka *B. mayonii* inta ugu badan qaniinyada shilinta lugaha madow (deer tick) taasi oo caabuqa bakteeriyadu *B. mayonii* uu hayo. Dhammaan shilinta lugaha madow ma sidaan bakteeriyadan, dhammaan dadka ay qaniinto shilinta lugaha madowna ma bukoodaan. Si la mid ah *B. burgdorferi*, shilintu waa inay ku dhagganaato qofka ugu yaraan 24-48 saacadood kahor intayna gudbin bakteeriyada *B. mayonii*

Shilinta lugaha madow waxay ku nooshahay dhulka meelaha dhirta leh ama meelaha kaynta badan leh. Shilintu waxay ka raadsataa wax ay ku dul noolaato heerka ama heer u dhaw waxayna qabsataa marka qof ama xayawaan meesha soo maraan. Shilintu ma booddo, duusho ama kama soo dhacdo geedaha.

Gobolka Minnesota, bilaha Abriil ilaa Luulyo iyo Sebtembar ilaa Oktoobar ayaa ah kuwa khatarta ugu wayn ee in shilintu qofka qaniinto. Khatarta waxay ugu badan tahay bilaha Juun ama Luulyo sanad kasta. Shilinta lugaha madow waa wax yaryar; kuwa qaangaarka ah waxay la xajmi yihiin siidhka sisinta kuwa carruurta ahna waxay la xajmi yihiin siidhka bobiga. Iyadoo xajmigeeda yari ugu wacan yahay. Qofku ma ogaan karo in shilin qaniinsan tahay.

## Maxay yihiin astaamaha cudurka *Borrelia mayonii*?

Baaxadda jirrada wali waa la sharxayaa cudurkan cusub ee dhifta ah. Hase yeeshee, astaamaha ugu caansan ee la soo sheegay ilaa hadda waxaa ka mid ah:

- **Qandho ama qarqaryo**
- **Xanuun murqaha ama lafaha**
- **Madax-xanuun**
- **Finan**

Si la mid ah cudurka Lyme ee ay keento *B. burgdorferi,* xanuunka roomatisamka (caabuqa iyo bararka kala-goysyada) ayaa sidoo kale la soo sheegay inuu yahay marxaladda dambe ee infakshanka ee bukaanada qaba jirrada ay keento *B. mayonii.*

## Sidee cudurka *Borrelia mayonii* lagu ogaadaa?

Haddii qofku tuhmo inuu qabo cudurka *B. mayonii* waa inay la xiriiraan dhakhtarka sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah looga baaro loogana daaweeyo. Baarista *B. mayonii* waxay kusalaysan tahay taariikhda gaadhista deegaan shilintu joogto, baaris jireed, iyo tijaabooyin shaybaar si loo xaqiijiyo waxa qofka haya.

## Sidee cudurka *Borrelia mayonii* loo daaweeyaa?

Cudurka *Borrelia mayonii* waxaa lagu daaweeyaa antibayootigis. Waxay u badan tahay cudurka *B. mayonii* inaad halmar wax ka badan markaa sii wad si aad uga ilaaliso naftaada qaniinyada shilinta oo la xidhiidh dhakhtarkaaga haddii aad tuhunto inaad leedahay astaamaha cudurka *B. mayonii*.

## Sidee baan u yarayn karaa khatartayda?

Wakhtigan ma jiraan wax tallaal ah oo bani-adanka loo heli karo cudurka *B. mayonii*. Yaraynta gaadhista meelaha shilintu joogto ayaa ha difaaca ugu fiican ee ka dhanka ah cudurka shilinta laga qaado.

**Iska ilaali qaniinyada shilinta:**

- Ogow meesha ay shilintu ku nooshahay iyo marka ay firfircoon yihiin.
    - Shilinta lugaha madow waxay ku nooshahay aagagga geedaha waawayn ama kaynta leh.
    - Gobolka Minnesota, firfircoonida shilinta lugaha madow waxay ugu firfircoon tahay laga bilaabo Abriil -- Luulyo iyo Sebtembar -- Oktoobar.
- Isticmaal celiye shilin oo ammaan ah iyo wax-ku-ool ah haddii aad joogto aagagga ama agagaarka meelaha shilintu ku nooshahay. Raac tilmaamaha waxsoosaarka oo dib ugu isticmaal sida la tilmaamay.
    - Isticmaal **celiyayaasha DEET** (ilaa 30%) maqaarka ama dharka. Ha u isticmaalin DEET dhallaanka ka yar da'da laba bilood.
    - Hore ugu sii daawee dharka iyo qalabka **celiyayaasha permethrin** kusalaysan si aad iskaga ilaaliso qaniinyada shilinta muddo ugu yaraan ah laba toddobaad adiga oo mar labaad isticmaalin. Ha u isticmaalin permethrin maqaarkaaga.
- Xiro dhar iftiin leh oo kaa caawiya inaad si dhib yar u aragto shilinta. Xiro shaadh iyo surwaal dheer si aad u daboosho maqaarkaaga.
- Ku dhaq dharka qallalan iyo qalabka kul sare ugu yaraan 60 daqiiqo kadib markii aad wakhti ku soo qaadatay aagag ay shilini ku nooshahay.
- Kala hadal dhakhtarkaaga xoolaha wax ku saabsan waxsoosaarka ammaanka iyo wax-ku-oolka ah ee aad isticmaali karto si aad u ilaaliso rabbaayaddaada.

**Hubi shilinta ugu yaraan halmar maalintii kadib markaad wakhti ku qaadato meelaha ay shilintu ku nooshahay.**

- Jirkaaga oo idil si dhaw ugu baadh muraayad, gaar ahaan meelaha ay adag tahay in la arko sida bisqinta iyo kilkisha.
- Soo goo shilinta isla marka aad aragto.
- Isticmaal birqabadyo ama farahaaga si aad shilinta u qabato meel afkeeda u dhaw. Si tartiib ah u soo goo shilinta. Ku nadiifi aagga saabuun iyo biyo.
- Ka baar qalabkaaga iyo rabbaayadahaaga shilin.

**Maaree meelaha ay shilintu ku nool yihiin:**

- Xaaq cawshka iyo dhabbooyinkana bannee si joogto ah.
- Googoo caleemaha iyo kaynta.
- Ka samee gidaar ah qoryo ama dhagaxaan halka u dhaxaysa cawska iyo looxaanta la googooyey.

Minnesota Department of Health
Vectorborne Diseases Unit
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164
651-201-5414
www.health.state.mn.us

*Borrelia mayonii* Disease – Somali (4/11/19)

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac 651-201-5414. Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyey.*